Habilitering & Hälsa
STOCKHOLMS LÄNS LANDSTING

Warbixin kooban oo ku saabsan – qaanuunka ku saabsan taageerada iyo adeegga loogu talo galay dadka qaybo jidhka ka mid ah ka curyaanka ah

Qaanuunka LLS (1993:387) waa qaanuun xuquuqeed oo micnahiisu uu yahay taageero dhammaystir ah oo loogu talo galay dadka sida aadka ah qaybo jidhka ka midka ah uga curyaanka ah.

Qaanuunku wuxu khuseeyaa

1.Dadka xagga koritaanka ka cilladaysan ee koritaankoodu aanu fiicnayn iyo dadka qaba cudurka autism (koritaanka maskaxda oo xumaada) ama qaba xaalad cudurkaas la mid ah

2.Dadka qaybo jidhka ka midka ah ka curyaanka ah ama xagga maskaxda ka dhaawacmay iyaga oo weyn.

3.Dadka sida weyn qaybo jidhka ka midka ah uga curyaanka ah, ee aanay taasi caadi ahaan ku xidhnayn da'da, ee dhibaato weynina ay ka haysato nolol maalmeedka isla markaana baahi weyn u qaba in la kaalmeeyo ama loo adeego.

Qofka ka tirsan mid ka mid ah kooxahan, ayaa wuxu codsan karaa in wax loo qabto. Waxqabad kasta oo qofku uu codsado waxa loo eegayaa oo loo tijaabinayaa qof kasta iskiisa.

Tobanka dadaallada wax qabadka ah marka la tixraaco qaanuunka LLSS tuduciisa § 9

1.Talo bixinta iyo taageerada kale ee qofeed ee lagu wanaajinayo dadka qaybo jidhka ka mida ka curyaanka ah iyo qaraabadooduduba waxay ka mid yihiin dadka loogu talo galay in la geliyo dadaallada waxqabadka ee joogtada ah, ee tayada leh, kuwaas oo ka kala imanaya meelo badan oo leh dad xirfado iyo aqoon kala duwen leh.

Taageerada waayo aragnimadu la socoto waxa loogu talo gelayaa xaalado nololeed oo wanaagsan, waxaana looga hortagayaa in ay sii socoto in qofku u sii ahaado qof qayb jidhka ka mid ah ka curyaanka ah. Dadaalladaas waxqabadku waxay noqonayaan talo bixin iyo hannaan guud oo taageero ah. Waxa kale oo weliba qofka qaybo jidhka ka midka ka curyaanka ah lagu dabbaqi doonaa iyada oo la gelinayo dadaal la xidhiidha xagga daaweynta, cilmi nafsiga, xagga bulshada iyo cilmiga waxbarashada iyo barbaarinta.

2. Adeegis qofeed oo loogu talo galay qofka **sidka ah** ugu baahan in qof ahaan sigaar ah loogu nidaamiyo daryeel ama xannaano caafimaad oo la xidhiidha nolol maalmeedka. Baahidu waxay noqon kartaa in qofka laga caawiyo xidhashada dharka, xagga saxada ama nadaafadda qofka, cunista ama la xidhiidhidda dadka kale.

3.Adeegga ledsagarservice ee loogu talo galay qofka u baahan in uu ka qayb qaato hawlaha fir-fircoonida ee xillifiraaqaha ammase sida kaleba uu uga qayb qaato nolosha bulshada.

4. Qofka lala xidhiidhayo - waa qof kaalmaynaya qofka, isla markaana u shaqeeya sidii saaxiib oo kale

5. Adeegga nasinta (avlösarservice) micnehiisu waxa weeye inuu guriga yimaado qof kaa nasiya oo sii xannaaneeya qofka qaba naafo xagga jirka ama maskaxda ah.

6. Deggenaanshaha muddeda gaaban ee qofka gurigiisa ka baxasan si dadka qaybo jidhka ah ka curyaanka ahi ay jeweiga deegaanka u baddelaan, isla markaana ay culayska uga yara qaadaan oo u nasiyaan eheladooda. Dadaalkaas wax qabadka ahna waxa qofka loo siin karaa hab ah qofka oo muddo gaaban la deggenaada qos ama xero (kaam) ama wax la mid ah.

7. Ilaalin muddo gaaban ah oo loogu talo galay dhallinyarada dugsiyada ee ka weyn 12 sano- Ilaalin ah ka hor iyo ka dib xilliga dugsiga iyo weliba fasaxa dhexdiisa, ilaalintaas oo loogu talo galay dhallinyarada dugsiyada ee qaybo jidhka ka curyaanka ah ee ka weyn 12 sano. Hawshaasna waxa lagu qaban karaa jardiinooyinka loogu talo galay xilli firaaqaha, ama waxay loo samayn karaa kooxo gaar ah ama si ka baxsan baahida qofka.

8. Degista guryaha xaasaska, ammse guri isagu leh adeeg gaar ah oo loogu talo galay carruurta iyo dhallinyarada. Carruurta iyo dhallinyaradu waxay dhammaystir ahaan ama baddelkii guriga waalidka la degi karaan qoys kale ama guri leh adeeg gaar ah.

9. Guryaha ama hoyga wata adeegga gaarka ah ee loogu talo galay dadka waaweyn ama guryo si gaar ah loo waafajiyey dadka waweyn- ayaa waxay noqon karaan guryo si gaar ah loo waafajiyey, guryo adeeg wata ama guryo dadku ay koox ahaan u wada deggen yihiin.

10. Hawlaha maalintii (waxay khuseeyaan dadka koritaankoodu aanu fiicnayn, ama qaba cudurka autism (koritaanka maskaxda oo xumaada) ama qaybo jidhkiisa ah ka curyaanka ah ama maskaxda ka dhaawacmay iyaga oo qof weyn ah.

Kooxda 1 iyo 2 marka xagga sare la eego). Hawlaha waxa lagu qaban karaa rugta ama xarun maalmeed ama goob shaqo oo kale.

Gobolka Istokhoom waxa jira rugta baxnaaninta ama rugta gobolka, kuwaas oo ka mid ah adeegga baxnaaninta iyo caafimaadka (**Habilitering & hälsa**), kuwaas oo ka jawaabaya dadaallada wax qabad ee loogu talo galay talo siinta iyo kaalmooyinka qofeed ee kale. Dadaallada kale ee wax qabad waxa laga dalban karaa degmeda. Lacagta gunnada ee loogu talo galay kalkaalinta qofka waxa maareeya ama maamula xafiiska qasnadda caymiska.

Adeegga gaarka ah ee naafada iyo waayeelka
Lag soo bilaabo 1da Jannaayo 2011 waxaa dhaqangalay isbeddelo looga dan leeyahay in lagu hagaajiyo duruufaha tayada wanaagsan iyo badbaadada marka laga hadlayo kaalmada gaarka ah ee naafada iyo waayeelka. Dhammaan isuduwayaasha kaalmadu waxay ruqsad ka dalbanayaan Socialstyrelsen. Ciddii shaqaaleyneysa gargaare khaas ah waxay codsigooda u gudbinayaan Socialstyrelsen.

Xaqa loo leeyahay in afka warbixino lagu soo gudbiyo (§ 8 a)
Kolka go'aan laga gaarayo waxqabadka ku qeexan xeerka SSL §9, wuxuu qofka ay khuseyso ama cidda wakiilka ka ah xaq u leeyihiin in booqdaan guddiga arrinta go'aaminaya oo af ahaan ugu soo gudbiyaan wixii warbixin ah.

Qorshe shakhsiyadeed ee xeerka SSL (§10)

Qofka loo oggolaado waxqabad sida waafaqsan xeerka SSL waxaa loogu deeqayaa qorshe shakhsiyadeed oo la socda waxqabadka loo go'aamiyey oo loo dejiyey iyadoo mar walba qofka la la tashanayo. Qofka helay go'aanka waxqabadku wuxuu mar walba xaq u leeyahay inuu codsado in qorshe loo dejiyo, haddii aan horay loogu soo dejin. Qorshahaasna waa in si joogto ah bishii hal mar dib loogu noqdaa.

Ka dacwoodka qaanuunka LLSS tuduca

Haddii qofku aanu ralli ku ahayn go'aan lagu gaadhay qaanuunka LLSS, ayaa qofkaasi wuxuu u dacwoon karaa maxkamadda arrimaha maamulka ee förvaltningsrätten. Haddii qofka codsi uu qortay lagu soo diido kolkaana weliba wuxuu heli karaa macluumaad ku saabsan sidii uu u dacwoon lahaa.

Laga soo bilaabo 1da Jannaayo 2011 wuxuu xeerka SSL ahmiyad weyn siinayaa carruurta (§§ 6a, 8)
Kolka la qaadayo tallabo carruurta khuseysa waa in ahmiyad gaar ah la siiyaa waxa ilmaha u wanaagsan. Kolka waxqabadku khuseeyo ilmo carruur ah, waa in ilmuhu uu helaa warbixin kaafi ah oo fursadna loo siiyaa inuu dhiibto fekradihiisa. Fekradaha ilmaha waxaa loo eegayaa da'da iyo garaadka ilmaha.

Baadhitaanka xannaanada iyo daryeelka (IVO) ayaa leh ilaalinta dhammaan hawlaha sida ku qoran LSS (§ 25)